

Tilmaamaha loogu talagalay Qoysaska u-beddelaya Taageerada Caruurta ee Qofka iyo Adeegyada Dhallaanka iyo Kuwa raadqaadka ah (ESIT)



Barnaamijka ESIT wuxuu la rabaa qoyskaaga inuu badqabo oo uu caafimaad ahaado. Adeeg bixiyeyaasha u imanaya inay ku arkaan waxay raaci doonaan tilmaamaha ka yimid gobolka iyo wakaaladahooda.

Miyay tahay inaan u gudubno adeegyada qof shaqsiga ah?

Waad ogtahay baahiyaha ilmahaaga iyo qoyskaaga in ka fiican qof kasta, waxaadna dooran kartaa waqtiga saxda ah ee loogu gudbi karo adeegyada qof ahaan. Iskuduwahaaga Kheyraadka Qoyska iyo adeeg bixiyeyaasha kale ayaa diyaar u ah inay ka wada hadlaan doorashooyinka.

Waa maxay doorshooyinkaygu?

Qoysasku waxay leeyihiin doorshooyin adeeg diriseed oo kaladuwan. Tusaale ahaan, waxa laga yaaba:

- Inay sii socdaan adeegyada qabashada telefoonka ee onlaaynka ah
- Dooro si aad u lahaato bixiye kuug yimaada gurigaaga
- Dooro si aad u buuxiso bixiye goobta dibada ka ah, sida baarkinka ama beertaada nasashada
- Ama isku darkasta oo doorshooyinkan ah

Yaa u baahan inuu xidho maaskaro inta lagu gudo jiro adeegyada shaqsiga ah?

Bixiyuhu wuxuu xidhan doonaa maaskaro markuu gurigaaga joogo. Ka hor booqashada guriga, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad wicitaan fiidiyoow la yeelato bixiyahaaga si aad u tusto ilmahaaga sida bixiyuhu u ekaan doono markuu xidho maaskaro. U sharax ilmahaaga in maaskaruhu uu ka dhigo qof kasta mid badqaba. Ilmahaaga kaasoo helaya adeega daryeelka shaqsiga ah loogama baahan doono inuu xidho maaskaro. Si kastaba ha noqotee, adiga iyo dadka kale ee ka weyn da'da shan sano gurigaaga waxaa lagaa codsan doonaa inaad u xidho midh.

Markuu adeeg bixiyahaygu yimaado gurigeenna, kulamadayadu ma la mid noqon doonaan sidii hore?

Haddii aad go'aansato inaad u gudubto adeegyada shaqsiga ah, adeeg bixiyahaaga ayaa dib u eegi doona shuruudaha badqabka ee wakaalada oo sharxi doona sida ay noqon doonaan. Shuruudahaan ayaa ka dhigi kara booqashooyinka marka hore inay ka duwan yihiin sidii hore, laakiin waxay u jiraan badqabkaaga. In kasta oo adeeg bixiyahaagu uu si shaqsi ah u geynayo adeegyada, haddana waxaa laga yaabaa inaanay wax sidii saxda ah la mid ahayn sidii cudurkii ka horreeyey. Waa muhiim in adiga iyo ilmahaagu aad dareentaan nafis inta lagu jiro xiliyada booqashada.

Su'aalo dheeraad ah?

Waxaa naga go'an inaan helno xulashooyin ka dhigaya badbaadada qoyskaaga inta aan ka shaqeyneyno himilooyinka koritaanka ilmahaaga. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan weydii adeeg bixiyahaaga ama Isu-duwahaaga Kheyraadka Qoyska.

Haddii aad jeclaan lahayd nuqulada dukumintigan oo qaab kale ama luqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Xidhiidh Sameeyaha (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION FS_0059 SM (04-2021) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES